



DUGSIGA SARE EE MADISON **XUQUUQDA KOOXDA TALA BIXINTA NAQSHADA**

Ujeedada iyo Doorka

Kooxda Tala bixinta Naqshada (DAG) waxay Kooxda Mashruuca Casriyeynta Madison talo ka siin doontaa horumarinta qorshaha dugsiga sare oo dhammaystiran, sinnaansha leh, isku-dhafan isla markaana leh aragti leh oo la kaashanayo ka qayb qaadashada bulshada dugsiga ee dhabta ah. Kooxda mashruuca ee Degmadu waxay si toos ah ula shaqayn doontaa DAG si loo xaqiijiyo in walaacooda iyo rabitaankooda la fahmo isla markaana la tixgeliyo. DAG waxay noqon doontaa qayb ka mid ah nidaamka ka qayb qaadashada naqshadeynta & daneeyayaasha oo ay ka mid yihiin Degmada & shaqaalaha dugsiga, ardayda, waalidiinta, xubnaha bulshada ka tirsan iyo kooxda la talinta naqshada. Nidaamkan waxaa ka mid noqon doona tixgelinta dokumentiyada tilmaamaya taariikhda, dhismaha, goobta, miisaaniyadda iyo shuruudaha xeerarka ee loo baahan yahay ee ay tahay in loo isticmaalo qiimeynta fursadaha naqshadeynta.

Doorka iyo mas'uuliyadaha xubnaha DAG:

- Ka qayb galka kulamada si ay kooxda mashruuca talo uga siiyaan walwalka, dhibaatooyinka, hadafka iyo rabitaanka ay leeyihiin bulshada dugsiga.
- U hoggaansanaanta xeerka anshaxa ee DAG.
- U sheegida iyo ka keenida jawaab celinta ee kooxaha iyo ururada xubnaha DAG ay matalayaan.
- Talooyinka ku saabsan qorshayaasha isgaarsiineed oo wax ku ool ah si loo gaaro dhammaan bulshada dugsiga kaasi oo loogu talagalay nidaamka mashruuca iyo dhacdooyinka ka qayb galka dadweynaha.
- In ay kooxda mashruuca ka caawiyaan goobaha dadka u furan 'open houses'.
- In ay ka caawiyaan dhacdooyinka dhagax dhiga iyo xafladda furitaanka weyn.

Baaxada Mashruuca

Ka dib xeerka barnaamijka lacagaha deynta ahaa ee 2017-ka, PPS waxay hore u sii wadaa qorshaynta, naqshadeynta iyo dhismaha Dugsiga Sare ee Madison oo la casriyeeyay. Dhismuhu wuxuu bilaabmi doonaa xagaaga 2019-ka.

Xubinimada

Naqshadeynta Dugsiga Sare ee Madison waxay ka koobnaan doontaa saddex weji oo aasaasi ah: wejiyada Qaabeyn, Horumarinta Naqshadeynta iyo Dhismaha. Xubnaha DAG waxaa laga filii doonaa in ay shaqeeyaan qiyaastii muddo ilaa lix bilood inta lagu jiro barnaamijka, qaabeynta naqshada iyo wejiyada horumarinta naqshadeynta. Kooxda naqshada waxaa laga yaabaa in ay doortaan in ay xubnaha DAG la socodsiiyaan isbedelada la taaban karo ee ku yimaada mashruuca ka dib wejiyada horumarinta naqshadeynta.

Shaqaalaha Dugsiga Sare ee Madison iyo Degmada ayaa dooran doona isla markaana magacaabi doona xubnaha DAG iyada oo la adeegsanayo nidaam codsi oo furan. Codsadayaal dheeraad ah ayaa laga yaabaa in loo baahdo in la shaqaaleysiyo si loo xaqiijiyo matalaad isku dheelitiran isla markaana buuxda ee bulshada dugsiga.

DAG waxay magacaabi doontaa **Guddoomiye** ama **Guddoomiye ku xigeeno** si ay DAG uga caawiyaan ajandaha kulanka & dib u eegista wax soo bandhigida, hagida qorshaynta kulamada



iyo nidaamka kulanka. *Shaqaalaha/dadka u shaqeeya PPS iyo xubnaha ka tirsan Guddiga ayaa laga yaabaa in aanay u shaqaynin Guddoomiye/Guddoomiye ku xigeeno ahaan.*

Kooxda waxaa ka mid noqon doona ugu yaraan hal xubin oo oo matalaya mid kasta oo ka mid ah kuwan soo socda: macallimiinta, ardayda, kooxaha waalidiinta dugsiga dhexe, waalidiinta xaafada, waalidiinta dugsiga laga imaanayo, ururka xaafada, ururka ganacsiga, ururada dhaqanka, barnaamijka dugsiga, barnaamijka jira isla markaana suurtagalka ah iyo/ama hawl wadaagayaasha lacageed, qalin jabiyeayaasha, maamulaha dugsiga iyo wakiilada guddiga dugsiga.

Xubin raba in uu iska casilo DAG waa in uu sidaasi qoraal ahaan ku sameeyaa isaga oo ku hagaajinaya maamulaha mashruuca Degmada; e-mail-ku waa mid la aqbali karo.

Haddii xubin ka mid ahi uu ku guuldareysto in uu ka qayb galo laba kulan oo kid mid ah kulamada DAG oo isku xiga iyada oo aan la haysan cudurdaar, ama haddii kale uu awoodi waayo in uu u shaqeeyo DAG, maamulaha mashruuca Degmada ayaa laga yaabaa in uu ku dhawaaqo in jagada DAG ay tahay mid bannaan isla markaana magacaabo qof kale oo ku habboon DAG.

Jadwalka Kulanka & Qaabka DAG

Qiyaasta ballanqaadyada la sameeyay waxaa ka mid ah: Qiyaastii shan kulan oo DAG leedahay, iyo hal goobaha dadka u furan 'open house' iyo kulan oo dadka u furan inta lagu jiro sanad dugsiyeedka 2017-2018-ka, oo ay la socdaan dhacdooyin kale oo suurtagal ah oo la qorsheeyay kuwaasi oo loogu talagalay xiriirka. Waqtiga dhacdooyinkaas waxaa lala simi doonaa jadwalka mashruuca guud iyo ka qayb qaadashada kale ee daneeyaha dugsiga iyo degmada.

Kulamada waxaa la qabtaa inta lagu jiro barnaamijka, qaabeynta naqshada iyo horumarinta naqshadeynta. DAG waxaa lala socodsiiin doonaa isbedelada baaxada leh ee mashruucu ee laga yaabo in ay dhacdo waqti dambe oo ka mid ah naqshadeynta iyo dhismaha.

Kulamada DAG waxaa lagu qaban doobaa Dugsiga Sare ee Madison iyada oo wax kala la tilmaamo maahane.

Kulamada DAG waxay u furan yihiin dadweynaha waxayna bixiyaan fursad loogu talagalay fikrad dhiibashada dadweynaha; waxyaabaha la xiriira kulanka iyo qoraalada kulanka waxaa la soo gelin doonaa internet-ka.

Fursad loogu talagalay fikrad dhiibashada dadweynaha ayaa la bixin doonaa dhammaadka kulan kasta. Fikrad dhiibashada dadweynuhu waxay ku koobnaan doontaa ilaa 10 daqiiqo oo ay la socoto ugu badnaan 3 daqiiqo oo ah warbixin qofkiiba. Kuwa doonaya in ay bixiyaan warbixin ku aadan DAG waxaa looga baahnaan doonaa in ay isku diiwaangeliyaan kulanka. Warbixintu waxay u dhici doontaa sida loo kala hor yimaado. Kaararka fikrad dhiibashada waxaa lagu bixin doonaa kulan kasta. Dadweynaha waxaa lagu dhiirigelinayaa in ay keenaan fikrad dhiibaso qoraal ah oo ku aadan DAG.

Fursadaha Ka Qayb galka Dadweynaha Ee Dheeraad ah

- Kulanka naqshadeynta iyo goobaha dadka u furan 'open houses' waxay furnaan doonaan bulshada ballaaran ee dugsiga iyo sidoo kale bulsho weynta guud. Qof walba waxaa lagu dhiirigelinayaa in uu ka soo qayb galo dhacdooyinkaas.



- Ujeedada laga leeyahay kulanka naqshadeyntu waa in la helo jawaab celinta dadweynaha oo ku saabsan falanqeyn, wax bedel ah iyo go'aano.
- Ujeedada laga leeyahay goobaha dadka u furan 'open houses' waa in ay dadweynaha la socodsiiyaan nidaamka iyo horumarka mashruuca.

Ku soo wareega dugsiga iyo/ama dhismaha

Tiro ka mid ah ku soo wareega xarunta waxbarasho ayaa la dejin doonaa taasi oo loogu talagalay xubnaha DAG ka hor ama inta lagu jiro qaabeynta naqshada. Kuwani waxay noqon doonaan tusaalooyinka naqshada dugsiga dhexe/sare ee degaanka (ama gobolka) taas oo loo isticmaali karo in lagu wargeliyo wada hadalka iyo ballaarinta aasaaska aqooneed.

Kooxda Mashruuca

Kooxda mashruucu waxay ka koobnaan doontaa naqshadeeyayaal, injineero, qorsheeyayaal, maamulaha mashruuca iyo shaqaalaha waaxda ee Xafiiska Casriyeynta Dugsiga (OSM). Waxay bixin doonaan ajandaha, wax soo bandhigida iyo tixgelinta la siinayo goobta; kooxda mashruucu waxay sidoo kale fududayn doontaa wada hadalka, qorista talooyinka, dejinta falanqeynta iyo fursadaha loogu talagalay kulamada DAG iyo dhacdooyinka dadweynaha.

Maamulaha mashruuca OSM, oo ah qofka koowaad ee Degmada lagala xiriiro mashruuca, ayaa kor kala socon doona kulamada DAG iyo dhacdooyinka ka qayb galka dadweynaha. Dhammaan isgaarsiinta laga helayo xubnaha DAG ee ka baxsan kulamada DAG waa in lagu hagaajiyaa maamulaha mashruuca PPS.

Go'aan qaadashada mashruucu waxay noqon doontaa mas'uuliyada Xafiiska Casriyeynta Dugsiga isaga oo la kaashanaya Hoggaanka Degmada kale hadba sida looga baahan yahay. Xubnaha DAG waxay ka qabtaan doorka tala bixinta oo kaliya, mana aha wakiilada rasmiga ah ee Degmada.